

Carruur ayaa tahay hadii aad 18 sano ka yartahay



ILMAHA SHISHEEYE GO'DOONO FARANSIISKA JOOGAAN :

MAXAAD XAQ ULEEDAHAY?

**TALOOYIN
AMA
XARIIRADA
KU
CAAWIYA**

The text is centered within a large circle. The circle's perimeter is marked by a dashed white line. Inside the circle, there are four stylized hands of different colors (light green, yellow, orange, and light blue) reaching outwards towards the corners.

Shaqada xirfadlayaasha : saraakiisha booliska, looyarada, masuulayaasha, macalimiinta, garsoorayaasha, dhaqaatiirta iwm in ay naftaada ilaaliyaan ayay meesha ujoogaan.

Dadkaas sheekadaada usheeg siday kuu caawiyaan

Cuntada, guriga, iskoolka, caafimaadka.... waa laguugu cawin karaa wax walba waa u bilaash carruurta !

Ha ka waaban inaad weydiiso su'aalo ku saabsan waxyaalaha aadan fahmin ama wax yaalaha aadan fahmin



**TUSAHA
XIRFADLAYAASHA
KU CAAWIN KARA :**
[www.infomie.net/
spip.php?rubrique124](http://www.infomie.net/spip.php?rubrique124)



Hadii markaad Faransiiska soo galeysay kaligaaga aad eheed oo waalid ama qof qoys kaaga kula socon, garsoorka wuxuu magacaabi karaa qof mas'uul kaa ah ama maamule ad hoc (waa qof 30 sano ka weyn, kalsooni lagu qabo, o garsoorka u magacaabay in uu mas'uul uu ka noqdo cunuga wali qaangaarin.



Waa qof qaraabo ay yihiin ama qof loo magacaabay. Qofkaas booska waalidka ayuu galaa.) mudo yar ayuu maamulahaas joogaa, inta codsiga magangelyada laga xareenaayo.





Boolsika

17 ama **112**
(wicitaan bilaash ah)

Booliska waxay meesha u joogaan in ay ku caawiyaan hadii aad tahay dhibane rabshad iyo hadii laguugu qasbay in aad samaysid wax aadan rabin oo kuu xun. Ogaaw hadii laguugu qasbay in aad wax xun samaysid, waxaa xaq u leedahay in lagu ciqaabin, xataa hadii wax xun aad saaysay ama wax sharci daro ah.

Hadii booliska ay ku waraystaan, waxaad **xaq** u leedahay in : qof weyn masuul kaa ah ku raaco, urur, looyar iyo turjumaan lacag la'aan. **Ha ka waaban inaad weydiiso**

→ Faransiiska, badanaa way adag tahay inii la aqoonsado cunuga shisheeye qaangaarka eheen oo go'doonmay. Hadii saas ay dhacdo, ASE ga (kuwa caawiya carruurta) wuxuu mas'uul ka yahay cuntadaada, gurigaaga, iskoolkaaga...

→ Mar kasta, urur yaal ayaa ku caawin karaan siduu ASE ga kuu caawiyo oo aad u heshid cawinaad bilaash ah.

→ Xafiis yahaas, waxaad tusaalo ahaan baran kartaa carruurta kale, waad cayaari kartaa, dad waa weyn aad kalsooni ku qabtid aad la sheekeensan kartaa, dhaqaatiir aad la kulmi kartaa (dhaqtarka maskaxda, kan naagaha, kan ilkaha...) ama af faransiiska aad baran kartaa..



KA GANACSIGA DADKA MAXAA WAAYE ?

Adiga ama qof saaxiib kaaga ah waxaa noqon kartaan dhibbanayaasha ka ganacsiga dadka adinka oo ogeyn.

Mar ma jirtaa oo lagaa rabay in aad :

→ **galmo sameysid** ama in aad **ku dhaqantid falfalka galmaada ?**

→ **Shaqeysid** (tusaalo qof guriisa ayaa joogtay caruurta ama nadaafada aad ka shaqeysay, warshad ama maqaayad) ?

→ **tuugsatid, xadid ama dambi gashid ?**

→ **beerta fashid, qaadid ama gadid daroogada ?**

→ **xubnahaada gadid ?**

→ « **Deen** » iska bixisid adoo shaqeynaya ama adoo samaynaya adeegyo kale ?

Adiga ama qoyskaaga ma la idiin hanjabay ?

Hadii su'aalahaan mid kamid aad « haa » ku jawaabtid, adiga ama saaxiibkaaga waxaa ahaan kartiin dhibbane ka ganacsiga dadka. U sheeg qof xirfadle ah oo aad ku kalsoon tahay sidaas ayuu kuu ilaalin karaa, adiga iyo carruurta kale.

**GANACSIGA
DADKA WAA DEMBI
AAD U CULUS IYO KU
XADGUDUB
XUQUUQDAADA.**

**Liiska ururada
Wadajirka ah ka soo
horjeeda ganacsiga
dadka :**

<http://contrelatrate.org/>



FARANSIISKA MARKII LA JOOGO, WAXAA XAQ ULEEDAHAY IN LOOYAR AMA URURYO AY KU SIIYAAN TALO XAGA SHARCIYAHOO SI BILAASH AH.

Waxaa kale oo jiraan xafiisyo xuquuqda ilaaaya iyo guryaha cadaaladda iyo xuquuqda oo laga helo meel walba Faransiiska dhaxdiisa :

Xafiisyaada xuquuqda ilaaliya :

www.annuaires.justice.gouv.fr/annuaires-12162/annuaire-des-points-dacces-au-droit-21772.html#cmq_path=liste&cmq_page=4

Guriyaha Cadaaladda iyo xuquuqda :

www.annuaires.justice.gouv.fr/annuaires-12162/annuaire-des-maisons-de-justice-et-du-droit-21773.html

SIDA LOO OGAADO DA'DAADA

Hadii aadan heysanin waraaqoyin cadeenaaya da'daada ama hadii dadka waa weyn qaarkood ay ka shakisan yihiiin waraaqoyin kaaga, waxay u baahan karaan in ay da'daada hubiyaan :

Waraaqoyin kaaga ayay fiirinaayaan

Lafa haaga ayee baaritaan ku sameen karaan (raadiyo ama baaritaanka ilkha)

Waxay balaminaayan qof xirfadle ah (waxay weydiinaayan su'aaloyin ku saabsan iskoolkaaga, meesha aad ku nooshahay iwm)

WAXAA JIRAAN MAGAALOYIN BADAN FARANSIISKA KU YAAL OO LEH XAFIISYO LOOYARO JOOGAAN LOOGU TALAGALAY CARRUURTA.

HA KA WAABAN IN AD LA XARIIRTID LOOYAR :

**Tusaalo, Paris
Parvis du tribunal de Paris
75017 PARIS**

01.42.36.34.87

**Lyon
176, rue de Créqui
Lyon 3
04.72.60.60.00**

MARKA SOO OGOOW !

Mar kasta go'aanka adaa leh ama waad aqbale aa waad diidee in aad baaritaankaas martid. Si kastaba ha ahaatee, waxaa roon in aad u dhawaatid xirfadlayaasha aad kalsooni ku qabtid siday kuu caawiyaaan waaxay na ku xirantahay xaaladdaada.



Ha ka waaban inaad weydiiso xirfadlayaasha kuu dhow meesha si bilaasha ah laguugu daaweyn karo iyo dhaqtarka maskaxda.




Faransiiska dhaxdiisa, wax barashada waa lacag la'aan waana qasab ilaa 16 jir. Mar mar, waa dhib in aad boos ka heshid laakinse inaad iska dhaftid ma ahan !



→ Faransiiska dhaxdiisa, 18 jir ka hor, waxaad joogi kartaa wadanka dhaxdiisa waxaana xaq u leedahay in adeegyada ilaalinta carruurta ku caawiyaan adoo heysanin waraaqoyin sharci ah sida baasaboor ama waraaqad dhalasho. Weydiiso talo bixin xirfadleyaal sidaad u qaadatid sharciga daganaanshaha (tusaalo, hadaad rabtid markii 16 sano aad gaartid in aad shaqeysatid ama hada mardhow sideed iyo toob gaareysid).



→ Ugu dambeyn, hadii aad halis ku jirtid in lagu cadaadiyo hadaad wadan kaaga ku noqotid, waxaad xaq u leedahay in aaad magangelyo codsatid. **Da' kasta aad jirtid** waad codsan kartaa laakin waa in sida ugu dhaqsiyaha badan u codsatid. Masuuliye ad hoc ama qofka masuulka kaa ah ayaa loo magacaabaa suu kuugu caawiyo hoolahaas.



LA CIMADE

Waa urur caawiya dadka qaxootida ah. Wax yjoogaan magaaloyin badan Fransiiska dhaxdiisa.

www.lacimade.org/



L'OFPRA

(Xafiiska Faransiiska Badbaadinta Qaxootiga iyo Dadka aan dal leehan)

markaad sheekadaada u sheegtid wuxuu firin doonaa codsigaaga.

www.ofpra.gouv.fr/

3saac subaxnimo – 9saac casirkii :
201 rue Carnot,
94136
Fontenay-sous-bois Cedex

01.58.68.10.10

Waxaad sidoo kale aqrisan kartaa waraaqoyinkaa aad ka heli kartid ciwaankaan saad u ogaatid wareysiga sida loo maro :

https://ofpra.gouv.fr/sites/default/files/atoms/files/ofpra_guide_de_lasile_mie_en_france.pdf





U DOODAYAASHA XUQUUQDA

Waxaa la qabsan karaa u doodayaal xuquuqa hadii cunuga xuquuqdiisa la ixtiraamin. Cunug si toos ayuu uqabsan karaa kaligiisa. Waa bilaash.

09.69.39.00.00


(qiimaha wicitaanka deegaanka)

[www.defenseurdesdroits.fr/fr/
saisir-le-defenseur-des-droits](http://www.defenseurdesdroits.fr/fr/saisir-le-defenseur-des-droits)

TUSAHA MAXKAMADAH CARRUURTA

waxaad sii toos u qori kartaa garsooraha carruurta suu naftaada u ilaaifiyo :

[http://www.annuaires.justice.
gouv.fr/annuaires-12162/
annuaire-des-tribunaux-pour
-enfants-21778.html](http://www.annuaires.justice.gouv.fr/annuaires-12162/annuaire-des-tribunaux-pour-enfants-21778.html)



QORAALKAN WAXAA LOO SOO SAARAY SA
BABTA OO AH WUXUU KA MID YAHAY
MASHRUUCA « REACT » QARASHKA QEYB
WAXAA BIXIYE MIDWOYGA YURUB. DIB AYAA
LOO QORAY OO LUUQADO KALE AYAA LAGU
TURJUMAY AYADA OO LOO MARAAYO
MASHRUUCA CAP

Waxaa isla shaqeynay...



XXXXXXXX.

